



Farriintani waxaa iyada oo ah Ingiriisi, Af-Ruushka, Simplified Chinese, Soomaali, Isbaanish iyo Vietnamese la soo geliyay :

<https://www.oregon.gov/dhs/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx>

Abril 26, 2021

Ku socota: Daneeyayaasha ODDS

Ka socota: Lilia Teninty, Agaasimaha, Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

Ujeedada: Macluumaadka Cusub ee Mashruuca Qorshe Dejinta

Febraayo, waxaan sameeyay [farriin](#) ku saabsan Mashruuca Qorshe Dejinta iyo ra'iyi urur si loo helo jawaab celin ku saabsan sidii loo wanaajin lahaa maamulka kiiska ee ka jira Oregon. Maamulka kiisku waa shaqo ay qabtaan Isku duwayaasha Adeegyada iyo Wakiilada Shakhsiyeed.

Mid ka mid ah hadafyada qorshaha istiraatiijiyadeed ee ODDS waa in la yeesho nidaam u sahlan in ay isticmaalaan dadka iyo qoysasku. Qorshe Dejinta waxaa diiradda lagu saaray xaqiijinta adeegyada iyo taageerooyinka dhanka nidaamkeena maamulka kiiska si la iskaga caawiyo hadafkaasi. Dadka qaba naafanimada maskaxda ama korriinku (I/DD) waa in ay awoodaan in ay taageero ka helaan Isku duwayaasha Adeegyada iyo Wakiilada Shakhsiyeed si ay u isticmaalaan adeegyada naafanimada koriinka. Waxaa in ay sidoo kale fahmaan waxyaabaha ay kala dooranayaan oo awoodaan in ay helaan adeegyada kale ee loo baahan yahay.

Dayrtii 2018, ODDS waxay qandaraas la gashay Shaqaalaha Maamulka Caafimaadka (HMA) si loo ogaado waxa sida fiican u shaqeynaya dhanka maamulka kiiska iyo waxa si fiican loo qaban kari lahaa. Qiyaastii 1,000 oo ah daneeyayaasha ku baahsan gobolka ayaa bixiyay talooyin.

Iyada oo ku saleysan jawaab celinta, HMA waxay daneeyayaasha kala shaqeysay sidii loo abuuri lahaa warbixin bixinaysa talooyin, ama qorshe

dejin “blueprint,” si dib loogu qorsheeyo adeegyada maamulka kiiska. Dadaalkani waxaa loo yaqaanaa Qorshe Dejinta.

Febraayo 2021, waxaanu soo saarnay ra’yi ururin si jawaab celin looga helo daneeyayaasha kaasi oo ku saabsan talooyin qabyo ah oo ku jira warbixinta. Dadka qaba I/DD, qoysaska iyo daneeyayaasha ayaa sheegay in ra’yi ururintu aysan buuxin baahiyahooda. Waxay rabaan in ay si buuxda ugu qayb qaadaan nidaamkani. ODDS waxay jawaab celintaasi u qaadanaysaa si niyad ah. Waxaanu wax ka beddelaynaa jadwalka iyo qorshaheena si aan u xaqiijino in daneeyayaashu, oo ay ku jiraan dadka qaba I/DD la maqlo.

Maxaa xiga?

Waxaanu dejin doonaa qayb cusub oo warbixinta Qorshe Dejinta oo ay sahlan tahay in la fahmo kuna qoran luqad cad. Warbixinta waxaa lagu turjumi doonaa luqaddo badan.

Xagaagan ODDS waxay qaban doonaa kulamo dhageysi oo diiradda lagu saarayo dadka qaba I/DD iyo qoysaska si dadka looga caawiyo in ay fahmaan warbixinta, oo loo siiyo taariikh iyo macluumaad ku saabsan warbixinta, loogana jawaabo su’aalaha.

ODDS waxay iskaashi la yeelan doontaa ururada bulshada iyo Kooxaha wax u dooda si la iskugu keeno kooxo kala duwan ‘focus groups’ oo loo soo ururiyo jawaab celin ku saabsan talooyinka Qorshe Dejinta. Waxaanu rabnaa in aanu gaarno dadka aynaan inta badan wax ka maqal oo xaqiijino in dhammaan codadka oo dhani ay yeeshaan fursad lagu dhageysto.

Waxa aanu ka barano kulamadani iyo ra’yi ururinta waxaa loo isticmaali doonaa in lagula shaqeeyo Qorshe Dejinta kooxda daneeyayaasha ah si loo dhammeystiro talooyinka. [Ra’yi ururintu](#) waxay ku sii jiri doontaa internet-ka ilaa laga gaarayo Ogoosto 31, 2021.

Qorshe Dejinta ma aha fursada kaliya ee jirta si gacan looga geysto qaabeynta mustaqbalka nidaamka maamulka kiiska ee ka jira Oregon. ODDS waxay sii wadi doontaa in ay si dhow ula shaqeyso dadka qaba I/DD, qoysaska iyo daneenayaasha si ay uga caawiso in la sameeyo nidaam buuxiya baayihooda. Kuwani waa adeegyadaada, waana in ay kuu shaqeeyaan adiga si aad u abuurto noloshu aad rabto.

Si Daacadnimo leh,



Lilia Teninty
Agaasimaha
Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

*Fariintii Agaasimihii hore ee ODDS ayaa laga heli
karaa [http://www.oregon.gov/DHS/SENIORS-
DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx](http://www.oregon.gov/DHS/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx)*

*Nagala soco Facebook @oregonDHS.IDD ama twitter @OregonODDS oo
wax ka ogow website-keena.*

Waxaad heli kartaa dokumentigan oo ku qoran luqaddo kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee braille ama qaabka aad doorbidayso. Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka ee Oregon kala xiriir 503-945-5811. Waan aqbalnaa wicitaanada nooc kasta leh ee adeegyada gudbinta farriimaha ee loogu talagalay Dadka dhagaha la, dhagaha la'-indhaha la', maqalku ku adag yahay ama qaba naafanimada dhanka hadalka. Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan bixiyayaasha adeegyada gudbinta farriimaha booqo www.oregonrelay.com ama www.fcc.gov/encyclopedia/trs-providers.